XAFIISKA AGAASIMAHA
Kate Brown, Gubanatooraha ama Badhasaabka

Oregon Health Authority

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Faakiska: 503-947-2341

Taariikhda: Juun 30, 2021

Tallooyinka Caafimaadka Dadweynaha:

Xirashada Maaskarooyinka, Waji Daboolashada iyo Daboolada Wajiga iyo Ka fogaanshaha Jireed ee Goobaha Dadweynaha

Qeexitaano. Wixii ujeedooyinka tallooyinkaan, qeexitaanada xiggo ayaa quseeyo:

- “Daboolka wajiga” waxaa loola jeedaa dhar, bac, warqad ama daboolo waji oo kale oo daboolayo sanka iyo afka oo si dhuuqsan loogu xiro sanka korkiisa, afka hoostiisa, iyo dhinacyada wajiga.
    - Kuwa soo socdaa **ma ahan** daboolada wajiga maxaa yeelay waxay ogolaanayaan siideynta dhibcaha: dabool leh kadin loogu talagalay inuu fududeeyo neefsashada, maaskarooyinka leh shabaqa, maaskarooyinka ama daboolada kale ee leh daloolo, godadka, duleylada ka muuqda naqshadda ama agabka, ama daloolada hawada.
- “Gaashaanka wajiga” waxaa loola jeeda qolof caag ah oo wax laga dhex arkayo oo lagu daboolo xaga sare ee madaxa ilaa iyo garka hoostiisa, oo ku wareegsada dhinacyada wajiga.
- “Shaqsiyaadka sida buuxdo loo tallaalay” waxaa loola jeedaa shaqsiga helay labadaba garoojooyinka labada garoojo ee tallaalka COVID-19 ama hal garoojo oo tallaalka halka garoojo ah ee COVID-19 iyo ugu yaraan 14 maalmood ka soo wareegatay tan iyo markii ugu dambaysay ee shakhsigu qaatay tallaalka COVID-19.
- “Goobta daryeelka caafimaadka” waxaa loola jeedaa meel walba meesha daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan daryeelka caafimaadka jirka ama dabeecada la gaarsiiyo oo ay ku jiraan, laakin kuma xadidna xarun walboo daryeelka caafimaadka ama wakaalada ku shatiyeysan sida waafaqsan ORS 441 iyo 443, sida isbitaalada, xarumaha qaliinka ambalaansaha, xarumaha dhalashada, xarumaha daryeelka bukaan jiifka gaarka ah, xarumaha daryeelka raago ee muddada dheer, xarumaha baxnaaninta bukaan jiifka, xarumaha bukaan jiifka jirada daran, guryaha xanaanada iyo xarumaha noolaanshaha la caawiyay, daryeelka caafimaadka guriga, daryeelka jirada daran, guriga dhexdiisa, goobaha baabuurta ama ku meelgaarka meesha daryeelka caafimaadka la gaarsiiyo (tusaale ahaan, xarumaha caafimaadka wareego, ambalaansaha), iyo xarumaha bukaan socodka, sida xarumaha dhiig sifeynta, xafiisyada dhaqaatiirta, xarumaha daryeelka degdega ah, xafiisyada la talinta, xafiisyada bixiyaa daawada taageerada iyo daawo kale sida daaweynta durida, daawada dhirta, xakameynta dabiiciga ah, xubno toosinta iyo lafo xanuunka, iyo xarumaha kaloo gaarka ah.
- “Maaskaro” waxaa loola jeedaa maaskaraha heer caafimaad.

- “Xarunta gaadidka” waxaa loola jeedaa garoon diyaaradeed, boosteejo bas, dekadaha doomaha yaryar, dekada ama dekadaha kale, saldhigga tareenada dhulka hoostisa maraa (oo ay ku jiraan xarun kasta go’an oo rakaabka laga soo qaado ama laga saaro), xarunta tareenka, dekadaha laga soo galo tareenka ama meel kasta oo kale oo bixisa gaadid iyada oo ku xiran xukunka Mareykanka.

Maamulka Caafimaadka Oregon *ayaa si xoogan ugu talinayaa* in:

- Shaqsiyaadka aan tallaalneyn ama halis ugu jiro cudurka COVID-19 ee daran inay sii wadaan inay xirtaan maaskaraha ama waji daboolashada oo joogteeyo ka fogaanshaha jireed oo ugu yaraan lix (6) fiit shaqsiyaadka kale markii ay joogaan meelaha dadka badan iyo kulamada weyn ee shaqsiyaadka. Meelaha dadka badan iyo isu imaatinnada ballaaran ee shakhsiyaadka waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn munaasabadaha, aagagga munaasabadaha, munaasabadaha isboortiga, carwooyinka, ciidaha, bandhigyada, xafladaha qalin-jabinta ama soo dhaweynta arooska.
    - ***OHA ma yeeleyso*** talinayso in shaqsiyaadku ay xirtaan gaashaanka wajiga halkii ay ka ahaan lahaayeen maaskarada ama wejiga qarinaya. Gaashaanada wajiga waxay aad ugu fiicnaan karaan kahortaga dhibcaha/faniinada kasoo baxa shakhsiyaadka, laakiin waxtar uma lahan xadidaadda siideynta qurubyada (aerosols) kuwaasi oo mari kara dhinacyada gaashaanka. Xerashada gaashaanka wajiga oo aan lahayn waji ama waji dabool hoosta gaashaanka waa in lagu xaddido xaaladaha marka maaskarada la xiranaayo ama wejiga la daboolayo inay suurtogal ahayn, sida:
        - Markii qofka uu qabo xaalad caafimaad oo ka hor istaagayso inuu xirto maaskarada ama waji dabool.
        - Markii dadka u baahanyihiin inay arkaan dhaqaaqyada afka iyo carabka si markaa loo wadahadlo (tusaale ahaan, marka lala hadlayo carruurta kujira heerarka kobaca qaarkood ama dadka uu maqalka dhibayo).
- Shaqsiyaadka sida buuxdo u tallaalan iyo difaaca jirka diciifay inay kala hadlaan bixiyaha daryeelkooda caafimaad wax ku saabsan taxadarada ay uga baahanyihiin inay sii joogteeyaan. Caddeynmuhu waxay muujinayaan tallaalladu inay sidii la rabay ka waxtar yaraan karaan markii la siiyo dadka difaaca jirkoodu kala dhimman yahay OHA ayaa ku talineyso in qaar ka mid ah shaqsiyaadka difaaca jirka daciifay dooqa ugu badqabsan ay tahay joogteynta maaskaraha iyo ka fogaanshaha jireed gaar ahaan markii ay u dhowyihiin dadka aan tallaalneyn.
- Shaqsiyaadka inay dib u eegaan oo raacaan tilmaamaha maaskaraha ee ka imaanayo Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka .

Carruurta 12 sanno jirka ah iyo ka yar

OHA *ayaa si xoogan ugu talineyso* in:

- Shaqsiyaadka ka hooseeyo da’da (2) AYSAN xiran maaskaraha, waji daboolashada ama daboolka wajiga.
    - Carrurta jirta laba (2) sano iyo wixii ka weyn waa inay xirtan maskaro marka ay saaran yihiin gadiidka dadweynaha iyo markay ku jiran xarumaha gaadiidka.
- Markii shaqsiyaadka gaaraan da’aha (2) illaa 12 xirtaan maaskaraha, waji daboolashada ama daboolka wajiga, inay sidaas ku sameeyaan caawinta iyo kormeerida dhow ee qof weyn. Tani waxaa sabab u ah carruurta yaryar waxay la kulmi karaan caqabadaha inay si ku haboon ugu xirtaan maaskaraha, waji daboolashada ama daboolka wajiga (tusaale ahaan, taabashada xad dhaafka ah ee waji daboolashada, aan iska badeleyn waji daboolashada haddii si muuqato u wasaqeysanyahay, halista ceejinta ama neefqabashada, iwm.)

Waxaa jiro goobaha qaar meesha maaskarooyinka, waji daboolashada iyo ka fogaanshaha jireed looga baahan karo.

Goobaha sida kuwa hoos ku qoran ayaa yeelan karo sharuudaha maaskarooyinka, waji daboolashada iyo ka fogaanshaha jireed. OHA ayaa ku talineyso in shaqsiyaadka iska hubiyaan sharuudaha ka hor intaysan helin adeegyada goobahaan.

- Goobaha daryeelka caafimaadka.
- Jeelasha dadka weyn iyo xarumaha asluubta.
- Xabsiga dhalinyarada iyo xarumaha asluubta.
- Goobaha shaqada qaarkood sida loogu baahanyahay Badqabka Shaqada iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OR-OSHA).
- Diyaaradaha, basaska, tareenada, iyo qaababka kale ee gaadiidka dadweynaha ee ku safrayo, gudaha, ama ka baxsan Mareykanka.
- Xarumaha gaadiidka Mareykanka sida garoomada iyo saldhigyada baska.
- Goobaha kale meesha milkiilaha ama howlwadeenka uga baahanyahay in shaqsiyaadka xirtaan maaskaro, waji daboolashada ama daboolka wajiga iyo ka fogaanshaha jireed.
    - Shakhsiyaadka waa inay ogaadaan in ganacsiyada qaarkood, dhacdooyinka ama xarumaha ay yeelan karaan sharuudaha maaskaraha, waji daboolashada, daboolka wajiga iyo/ama sharuudaha ka fogaanshaha jireed oo way ka reebi karaan ganacsiyadooda dhacdada ama xarunta shaqsiyaadkaas kuwaas oo, aan laga eegin heerkooda tallaalka, haddii ay ku guuldareystaan inay u hogaansamaan sharuudahaas.
    - Shakhsiyaadka qaba xaalada caafimaadka eek u adkeyso inay neefsadaan ama curyaannimada ka celiso in shaqsiga xirto maaskaraha, waji daboolashada, daboolka wajiga ay ka codsan karaan hoy howlwadeenka ganacsiga, dhacdada ama xarunta si ay ugu suurtogeliso gelitaan buuxo oo simman ee adeegyada, gaadiidka iyo xarumaha u furan dadweynaha.
    - OHA ayaa ku talineyso in ganacsiyada, dhacdooyinka ama xarumaha inay lahaadaan sharuudaha maaskarooyin, waji daboolashada, daboolka wajiga

iyo/ama ka fogaanshaha jireed dhajiyaan boor (ama aastaamo) iyo sharuudahaas ka jiro ee ay arki karaan dhammaan shaqsiyaadka galayo dhismooyinka.

Dhigaalada Dheeraadka ah

- Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka: Hagidaada ee Maaskarooyinka
- COVID-19 iyo Oregon OSHA
- Dhigaalada COVID-19 ee Qaybta Waxbarashada Hore
- Guddiga Isku-dubbaridka Tacliinta Sare ee Khayraadyada COVID-19
- Ilaha Waaxda Waxbarashada ee Oregon
- Illaha Maamulka Dhalinyarada Oregon
- Waaxda Oregon ee Illaha Asluubta
- Bogga Interneet-ka ee OHA ee Maaskarada iyo Waji Daboolka

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.